## Khataraha Iibsiga, Maal gashiga, ama Ku Ganacsiga Lacagaha Oonlaynka ah

Nuqulladii Hore: Maayo 15, 2014 iyo Maarso 11, 2014

DFI ayaa dib u eegaysa tusmadeeda, kaasoo la sameeyay ku dhawaad sagaal sano kahor. Inkastoo lacagta oonlaynka ah iyo hantida oonlaynka ah ay xoogaysteen, qaar badan oo kamid ah isla khataraha ayaa jira. Tusmadaan waxaa loogu talagalay in isku dhafo xogta ay horey u soo saartay DFI iyo tumsada ay soo saareen Gudiga Ganacsiga ee Federaalka[1] iyo North American Securities Administrators Association[2]. Si aad wax uga ogaato tusmadaan, weedha "lacagta oonlaynka ah" waa magaca kale ee "cryptocurrency."

### Ka fiirso waxyaabaha soo socda kahor intaadan iibsan, maal gashan, ama ku ganacsan lacagaha oonlaynka ah:

**Qiimeyaasha lacagaha oonlaynka ah ayaa si joogto ah isbadella.** Khatarta isbadbadelka qiimaha ayaa ah mid kamid ah khataraha ugu waawayn ee haysashada lacagaha oonlaynka ah. Qiimaha lacagta oonlaynka ah ayaa isla markaba isbadeli kara, xataa isbadeli kara saacad gudaheed. Lacagaha oonlaynka ah ayaa ka isbadbadal badan maalgashiyada caadiga ah, sida suuqyada sicirka iyo lacagaha maalgashiga daynta, taasoo ka dhigaysa kuwo aan ku haboonayn maalgashadeyaasha doonaaya kaydadka mudada dheer ama leh yoolalka kaydka hawlgabka. Maal gelin u dhiganta kumanaan doolar maanta ayaa bari noqon karta wax bilaa qiimo ah. Haddii qiimaha lacagta oonlaynka uu hoos u dhaco, ma jirto damaanad ah inay markale kor u kacayso. Qof kasta oo haysta lacagaha oonlaynka ah waa inuu ka warqabaa inuu lumin karo qayb wayn oo kamid ah maal gashigiisa marka suuqu isbadelo. Marna ha ku maal gashan wax ka badan inta aad awoodo inay kaa lunto oo samayso galka maalgashiyada kaladuwan si ay kuu caawiso marka suuqu kor iyo hoos aado.

**Lacagta oonlaynka ah ma taageerayso dawladu.** Lacagta oonlaynka ah caymis kama hesho dawlad sida doolarka Maraykanka ee lagu shubay koontada baanka caymiska ka haysta FDIC. Haddii wax ku dhaco koontadaada ama kaydka lacagta oonlaynka ah, dawlada wax masuuliyad ah kama saarna inay talaabo qaado ayna kaa caawiso soo celinta lacagtaada. Marka lacagtu lunto, ma jirto qaab aad kusoo ceshan karto oo aad kusoo magato.

**Ma jirto damaanad ay dawlada ama bangi uu ku siinaayo oo ah in lacagtaada oonlaynka ah loo badeli karo lacagta doolarka Maraykanka.** Sabab la xariirta dabiicada isbadbadalka badan ee ganacsiyada lacagta oonlaynka ah, waa suuragal in lacagtaada oonlaynka ah ama doolarka Maraykanka aadan ula bixin karin sidii aad filaysay.

**Lacagta oonlaynka ah ayaa ku lumi karta dalaafka ganacsiga.** Baraha kaladuwan ee lacagaha oonlaynka ah ayaa soo gudbiyay cadaynta dalaafka taasoo ku sababtay macaamiisha inay lumiyaan lacagtooda ama laga xiray gelitaanka lacagtooda intii muddo ah. Waxaa intaas dheer, haddii aad koontada lacagta oonlaynka ah ku leedahay aalad dalaaftay, maxkamada ayaa kuu aqoonsan karta dayn bixiye aan damaanad haysan, taasoo ka dhigan inaadan awoodin inaad la baxdo lacagtaada oonlaynka ah ama aad hesho qiimaha buuxa ee lacagtaada oonlaynka ah.

**Lacagta oonlaynka ah xal macquul ah uma ahan dadka aan haysan bangiga ama bangi ku filan.** Dad badan oo u ol-oleeya lacagaha oonlaynka ah ayaa sheegay in lacagta oonlaynka ah ay tahay qaab ay dadka aan haysan bangiga iyo kuwa bangida ku filan aan heli karin ay ku helaan adeegyada dhaqaalaha. Arintaan ayaan ahayn mid xaqiiq ah, maadaama koontooyinka bangida ay shardi u yihiin kahor intaan qofku isticmaalin nidaamyada lacagta oonlaynka ah. Waxaa intaas dheer, baraha lacagaha oonlaynka ah ayaan bixin isla difaacyada koontooyinka caymiska ka haysta federaalka, sida koontada bangi caymis uga jira FDIC ama koontada midawga dayn bixiyaasha caymiska ka haysta NCUA. Haddii aad u baahan tahay lacago aad ku bixiso biilasha ama aad ku buuxiso waajibaadka kale ee dhaqaalaha, koontada lacagta oonlaynka ah ayaa kuu diidi karta helitaanka lacagaha taariikaha loo baahnaa ama lacagaha ayaa gebi ahaanba kaa lumi kara.

**Lacagta oonlaynka ah maaha qaabab la isku halayn karo si loo dhiso loona ilaaliyo hantida bulshooyinka Madoowga ah, Asaliyiinta, iyo Dadka aan Cadaan ahayn (BIPOC).** Sida ay sheegtay Dadka waawayn ee Eeshiyaanka, Madoowga, iyo Hisbaaniga ayaa uga badan dadka waawayn ee Cadaanka ah inay maalgashadaan, ku ganacsadaan, ama adeegsadaan cryptocurrency.[3] Waxaa intaas dheer, tiro kamid ah ciyaaryahannada iyo dadka caanka ah ayaa u xayiisiiyay lacagaha oonlaynka ah bulshooyinka BIPOC ayagoo sheegay inay yihiin maalgashi amaan ah oo faa'iido badan oo ay qani ku noqon karaan. Qaar kamid ah shaqsiyaadkaan ayaa hadda waajahaaya dacwado madani ah ama eedaymo uga imaanaaya Gudiga Amniyaadka Dhaqaalaha iyo Sarifka ee Maraykanka (SEC). Maalgashiga lacagta oonlaynka ah waa khatar lamana xaqiijin inay tahay qaab amaan ah oo la isku halayn karo oo lagu dhisi karo laguna haysan karo maal badan.

**Kaydadka oonlaynka ah ayaa u nugul in la jabsado.** Iibsadeyaasha lacagaha oonlaynka ah ayaa ku tiirsan awooda nidaamyadooda kumbuyuutarka gaarka ah iyo sidoo kle nidaamyada ay baxshaan qolyaha sadexaad si ay uga difaacdaan lacagaha ay oonlaynka ah ee ay iibsadeen tuugada. Sarifyada qaar ee baxsha kaydka lacagaha oonlaynka ah ee macmiilka kuna kaydinaaya waaleedyo ayaa awoodi waayay inay lacagaha difaacaan. Waxaa jirta marar kaladuwan oo macaamiishu ay lumiyeen dhammaan lacagahooda sabab la xariirta in waaledyadooda la jabsaday. Abuurista waaled oonlayn ah si loogu kaydiyo lacagaha oonlaynka ah ayaa u baahan inaad software kusoo degsato kumbuyuutarkaaga iibsadaha. Si lamid ah soo dejinta software kasta, tuugada wax jabsata ayaa ku dari karta koodh khiyaano ah.

**Lacagaha lagu baxsho lacagaha oonlaynka ah ayay adag tahay in la dabagalo lana soo cesho.** Lacagta oonlaynka ah ama maal gashiyada la xiriira crypto ayaa keliya ku shaqeeya interneedka. Dadka sameeya ayaa joogi kara meel kasta aduunka, marka way adag tahay in la dabagalo lana soo cesho lacagta luntay ayadoo la maraayo maxkamada.

**Lacagaha oonlaynka lagu baxsho ayaan lahayn difaac ku filan.** Lacag bixinta lacagaha oonlaynka ah ayay badanaa kooban tahay damaanadoodu. Kaararka daynta iyo kuwa bangiga ayaa leh difaacyada sharciga ah haddii wax qaldamaan. Tusaale, haddii aad u baahan tahay inaad tabasho ka keento iib, shirkadaada kaarka daynta ayaa leh nidaam kaa caawinaaya inaad soo ceshato lacagtaada. Lacagaha oonlaynka ah ayaan badanaa lahayn difaacyada noocaas ah. Marka aad lacag ku bixiso lacag oonlayn ah, waxaad caadiyan soo ceshan kartaa lacagtaada haddii qofka aad u dirtay kuusoo celiyo. Kahor intaadan wax ku iibsan lacagta oonlaynka ah, baro aaminaada lagu qabi karo iibsada adoo baaritaan samaynaaya kahor intaadan lacagta siin.

**Qaar kamid ah xogta la xiriirta lacagta aad dirtay ayaa noqonaaya mid cid kasta aragto.** Dadka ayaa sheega in lacagaha lagu baxsho lacagaha oonlaynka ah ay yihiin kuwo qarsoodi ah. Laakiin xaqiiqadu waa in lacagaha oonlaynka ah ee la isku diro lagu qori doono diiwaan dadwayne oo loo yaqaano “blockchain.” Ayadoo ku xiran blockchain-ka, xogta lagu daray blockchain ka ayaa lagu dari karaa faahfaahin sida cadadka lacagta la diray, iyo sidoo kale ciwaanka kaydka lacagta ee diraha iyo loo diraha. Mararka qaar waxaa suuragel ah in la adeegsado xogta lacag dirista iyo waaladka si loo aqoonsado dadka lacag dirista qaybta ka ahaa.

**Baar taariikhda shaqo ee barta lacagta oonlaynka ah ama ganacsiga kahor intaan la maalgelin.** Xaqiiji in shirkadu ay tahay mid ruqsad iyo sharciyan ka haysata Gobalka Washington. Sarifyada aan sharciyada lahayn ayaan lahayn xakamaynada gudaha ee saxda ah, taasoo ka dhigaysa kuwo u nugul khiyaannada, tuugada, iyo jabsiga. Hubi shuruudaha iyo xeerarka heshiiska koontada si aad u xaqiijiso inaad fahanto xuquuqdaada ku cad shuruudaha heshiiska. Arintaan ayaa ka dhignaan karta inaad akhrido bogag badan oo "daabacan" ama inaad xog dheeri ah toos uga codsato shirkada si aad si buuxda ugu fahanto khataraha.

**La xiriirida fal danbiyeed.** Sabab la xariirta lacagaha oonlaynka ah oo bixinaaya qarsoodida qaar, danbiileyaasha ayaa u arka lacagaha oonlaynka ah qaab waxtar u leh suuqyada madoow ee lacagaha, afduubka, iyo danbiyada kale.

**Canshuuraha saaran.** Lacagta oonlaynka ah ayaa loo arkaa hanti lacagaha la isku dhaafsado ayay canshuuraysaa Dawlada Maraykanka. Booqo webseedka IRS si loo helo xog dheeraad ah.

## Difaac Lacagtaada oo Iska Ilaali Khiyaanooyinka:

**Marna ha bixin koontadaada baanka oonlaynka ah ama baasweeka.** Tuugada ayaa iska dhigaaya inay yihiin ganacsi xalaal ah, sida dayn bixiye, waxayna kaa codsanayaan iaad u soo dirto bitcoin ama kaa codsanayaan xisaabaadka oonlaynka ah. Xaqiiji inaad la shaqaynayso xarun dhaqaale oo ruqsad iyo sharciyad haysata kahor intaadan siin xogtaada bangiga cid sadexaad.

**Qof kasta ayaa iska dhigi kara qofkuu doono oonlaynka.** Tuugada ayaa iska dhigaayo webseedyo waxayna adeegsadaan koontooyinka baraha bulshada ee been abuurka ah si ay u qariyaan aqoonsigooda. Maalgashadeyaasha waa inay mar kasta qaadaan talaabooyin ay ku aqoonsanayaan koontooyinka tuugada ah ayagoo si dhow u eegaaya mawduuca, qiimaynaaya taariikhaha diiwaan gelinta iyo xaqiijinta tayada wada shaqaynta. Si loo xaqiijiyo in maalgashadeyaashu aysan si kama' ah ula macaamilin shirkad been abuur ah, si taxadar leh iskaga eeg magacyada shabakada oo wax badan ka ogoow sida aad u difaacayso koontooyinkaaga oonlaynka ah.

**Iska ilaali fikradaha macaamiisha ee been abuurka ah.** Tuugada ayaa badanaa tixraac ka dhigta ama soo daabaca fikrado wanaagsan, haddana been ah oo ay soo direen macaamiil ku qanacday. Fikrdahaan marqaati kaca ah ayaa abuuraaya muuqaal ah in cida wax iibinaysa yahay mid la isku halayn karo – uu horey u sameeyay macaash wayn, maal gashadeyaasha cusubna ay isla macaashkaas dhaqaale ka helayaan isla sidii ay uga heleen maalgashadeyaashii hore. Inkastoo, marar badan, fikradaha aysan soo dirin macaamiil qanacsan laakiin uu qorey tuuga ganacsiga sheeganaaya.

**Hadday u muuqato mid aad run ugu eg, dhab ahaantii way tahay mid aad ugu dhaw run.** Tuugada ayaa badanaa khiyaana maalgashadeyaasha cusub ayagoo u balan qaadaaya lacag macaash ah oo amaan ah, faa'iido leh, oo damaanad leh muddo kooban gudaheed - mararka qaarna lagu cabiray saacado ama maalmo halkii ay noqon lahayd bilo ama sanado. Xiyiisiinadaan ayaa badanaa ah astaanta tuugada, iyo sidoo maalgashiyada ayaa leh heerar sare oo khatar ah, faa'iidooyinka laga heli karana waxay ku xiran yihiin heerka khatarta. Xog badan ka ogoow astaamaha digniinta ee tuugada maalgashiga.

**Keliya tuugada ayaa codsada in lacagta loogu diro nidaamka lacagaha oonlaynka ah.** Ma jiro ganacsi xalaal ah oo kaa dalbanaaya inaad lacagta oonlayn ahaan ugu dirto si hormaris ah - kaama codsanaayo inaad wax ku iibsato, ama inaad difaacato lacagtaada. Taasi markasta waa tuugo.

**Keliya tuugada ayaa damaanad qaadamacaash ama faa'iido wayn.** Ha aaminin dadka balan qaadaaya inaad helayso lacag degdeg ah oo fudud adoo adeegsanaaya suuqyada lacagaha oonlaynka ah.

**Ha isku qasin talada shukaansiga oonlaynka iyo maalgashiga.** Haddii aad qof kula kulanto bar ama ab shukaansi, uuna doonaayo inuu ku tuso sida loo maalgashado lacagaha oonlaynka ah, ama ama kaa codsado inaad lacag oonlayn ah soo dirto, waa tuugo.

[1] *Waxa ay Tahay inaad ka Ogaato Cryptocurrency iyo Tuugada*, Gudiga Ganacsiga ee Federaalka: Talada Macaamiisha (Maayo 2022), https://consumer.ftc.gov/articles/what-know-about-cryptocurrency-and-scams.

[2] Iska Ilaali Ka fiirsi La'aanta Maal gashiga *Crypto,* North American Securities Administrators Association (NASAA) (Abriil 2018), https://www.nasaa.org/wp-content/uploads/2018/04/Advisory-Cryptocurrencies-NASAA.pdf; *NASAA Ayaa Shaacisay Khataraha Ugu Waawayn ee Maalgashadaha sanadka 2022*, North American Securities Administrators Association (NASAA) (Janaayo 10, 2022), https://www.nasaa.org/61477/nasaa-reveals-top-investor-threats-for-2022/?qoid=newsroom.

[3] Andrew Perrin, *16% kamid ah Ameerikaanka ayaa sheegay inay mar uun maalgashadeen, ku ganacsadeen ama isticmaaleen cryptocurrency*, Pew Research Center (Cilmi baaris 11, 2021), https://www.pewresearch.org/fact-tank/2021/11/11/16-of-americans-say-they-have-ever-invested-in-traded-or-used-cryptocurrency/.